

Ku xiridda qof kasta oo ku nool Gobolka Washington daryeelka ilkaha

DentistLink waa adeeg gudbin dhaqtareed oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay qofkasta oo jooga Washington, oo ay kuu keentay Arcora Foundation, oo ah aasaaska Delta Dental of Washington.

Khabiiradayada takhasuska leh ee gudbinta ayaa si adag u shaqeeya si ay uga caawiyaan isku xidhka dadka daryeelka ilkaha ee bulshada.

Waxaan kaa caawinaynaa inaad hesho daryeelka ilkaha ee aad u baahan tahay haddii aadan caymis lahayn ama aad caymis leedahay, oo ay ku jiraan Apple Health (Medicaid).

Raadinta daryeelka ilkaha ee bulshadaada? DentistLink ayaa kaa caawin kara!

Seddex Dariiqo oo loo Isticmaalayo DentistLink

- **Ka Raadi tusaheena "Find a Dentist"**
Buuxi qaar ka mid ah macluumaadka aasaasiga ah ee ku saabsan baahiyahaaga iyo goobtaada ee lagu helayo online-ka ee bixiyaha ilkaha ee deegaankaaga ah. Ka raadi boggaaga waqti kasta.
- **Wac ama u qor farriin kooxda DentistLink**
La heli karo: Isniinta-Jimcaha | 8am subaxnimo – 5pm galabnimo | 844.888.5465
Waxaad si toos ah ula xiriiri kartaa Khubaradayada Gudbinta adigoo farriin qoraal ah u diraya ama na soo wacaya. Waxaan sidoo kale kusiin karnaa macluumaadka ilaha, oo ay ku jiraan gaadiidka. Adeegyada tarjumaadda la heli karo markii aad nala hadlayso.
- **Booqo website-kayaga oo buuxi foom gaaban, oo aan kula soo xiriirno**
Ka jawaab dhowr su'aalood oo ku saabsan da'daada, goobtaada, iyo nooca baahiyahaaga ilkaha. Khabiirka Gudbinta ayaa kadib kugu xiri doona dhakhtarka ilkaha ee ku haboon baahidaada.

Maxaad ka Rajaynaysaa Balantaada Ilkaha

Si loo yareeyo faafitaanka COVID-19, laga soo bilaabo Maarso 19, xafiisyada ilkaha badankood ee Washington waxay u furnaayeen oo keliya baahiyaha degdegga ah ee ilkaha. Hadda, sida gobolkeennu u bilaabmayo inuu dib u furmo, xafiisyada ilkaha ayaa fulinaya talooyin cusub oo ku saabsan xakamaynta cudurka.

Dhammaan isbeddeladan iyo taxaddarradan ayaa ah ilaalinta adiga, qoyskaaga, iyo shaqaalaha ilkaha caafimaadkooda iyo badqabkooda. Halkan waxaa ku yaal su'aalo kaa caawinaya inaad u diyaar garowdo booqashadaada xigta ee ilkaha.

Maxay kaga duwanaan doontaa booqashadayda?

Si laguugu ilaaliyo bedqabkaaga, dhammaan aagagga xafiiska waa la nadiifin doonaa jeermiskana waa laga dili doonaa, oo ay jiraan qolka sugitaanka iyo qolalka imtixaanku. Waxyaalaha nadaafadda, sida gacmo nadiifiyaha iyo masaxa, ayaa sidoo kale la heli doonaa.

waxaad ku arki doontaa taxadiro cayiman sida kala fogaanshaha qofeed. Xafiisyada qaar waxy ku waydiin doonaan in aad soo wacdo qaybta soo dhawaynta markaad timaado kadibna aad ku sugto gaarigaaga inta ay diyaar kuu noqonayaan qaar kale wax ay dib u habayn ku sameeyeen qolka sugitaanka iyagoo ilaalinaya kala fogaansha lixda fiit.



Markii aad wacdid ballan, waxaa lagu weydiin doonaa su'aalaha baaritaanka caafimaadka aasaasiga ah si loo hubiyo inaad caafimaad qabto oo aad ballan u diyaar tahay.

Xafiisyada ilkaha ayaa ku ogeysiin doona talaabooyinka qaaska ah ee ay qaadayaan si amaankaaga loo ilaaliyo. Waa kuwan qaar ka mid ah su'aalaha dheeriga ah ee lagu weydiinayo si aad u ogaato waxa laga filayo.

- Maxaan sameeyaa marka aan imaado ballanta?
- Ma u baahanahay inaan xirto maaskaro ama qalab kale oo ilaaliya shaqsiyadayda, sida galoofyada?
- Ma u baahanahay inaan xirto maaskaro ama qalab kale oo ilaaliya shaqsiyadayda, sida galoofyada?
- Xagee ku sugaayaa inta xubin qoyskeyga ah uu joogo ballanta?

Maxay ka dhigan tahay in "la baaro" ballanta ka hor?

Ballantaada ka hor, xubin ka mid ah shaqaalaha xafiiska ilkaha ayaa ku weydiin doona xoogaa su'aalo ah baaritaanka caafimaadka si adiga iyo bukaannada kale badbaado loogu ilaaliyo. Markaad timaaddo ballantaada, waxay ku weydiin doonaan su'aalahan mar labaad, oo ay weheliyaan qaadista heerkulkaaga

Tusaale su'aalaha baaritaanka

- Qandho miyaad leedahay mise waayadan dambe dareentay kulay/qandho?
- Ma ku haysaa neefsasho gaaban ama dhibaatooyin kale oo xagga neefsashada ah?
- Qufac ma leedahay?
- Ma leedahay wax astaamo u eg hargabka, sida arrimaha dheef-shiidka, madax xanuun ama daal?
- Ma la kulantaa calaamado kale oo ay tahay inaan ogaanno?
- Miyaad la xiriirtay qof laga xaqiijiyay in uu qabo COVID-19 ?
- Miyaad ka da' weyntahay 60?
- Miyaad leedahay wadne,sambab ama kelyo xaunuun, sonkorow ama cudurkasta oo is difaaca?

Haddii aad "haa" uga jawaabto mid kamid ah ama in ka badan oo ka mid ah su'aalahan dhakhtarka ilkaha ama shaqaalaha xafiiska ayaa si qoto dheer wadahal kula yeelan doona ka hor inta aanad u dhaqaaqin ballanta. Sida had iyo jeer ah, haddii aad dareento inaanad fiicnayn, badbaadada naftaada, shaqaalahaaga iyo dadka kaleba, waxaa fiican inaad guriga iska joogto oo ballantaada u ballamiso wakhti kale.

Maxaa taxaddarro dheeraad ah oo xagga nabadgelyada ah la qaadi doonaa?

Dhammaan xirfadleyda ilkaha waxay xiran doonaan waji-gashi, gacmo gashi, iyo qalab kale oo shaqsiyeed oo ilaalin ah inta lagu guda jiro ballantaada. Shaqaalaha soo dhawayntu waxay xiran doonaan waji-daboolan iyo / ama waxay leeyihiin gaashaan ammaan ah miiskooda.

Dhammaan shaqaaluhu sidoo kale way iska ilaalin doonaan isgacan qaadka ama taabashada kale ee aan loo baahnayn ee bukaanka.

Bixiyeyaasha ilkaha waxay fahmeen inay tani tahay jawi cusub oo ilkaha ah, waxayna diyaar u yihiin inay si faahfaahsan kaagala hadlaan ballantaada kana jawaabaan wixii su'aalo ah ee aad qabto.



Su'aalo ?

limayl: DentistLink@ArcoraFoundation.org

Naga soo wac: 844.888.5465




ARCORA

The Foundation of Delta Dental of Washington

SIDEEN UGU ILAALIN KARAA ILKAHAYGA GURIGA?

Waxaa jira habab fudud oo wax ku ool ah oo lagu hubiyo in afkaagu caafimaad qabo inta aad guriga ku jirto.

Ku caday ilkahaaga daawada ilkaha ee foloraydh muddo laba daqiiqo ah, hal mar subaxdii iyo hal maroo habeenkii ah.



Ku findhicilo dun hal mar maalintii.

Ka fogow cabitaanka sonkorta leh iyo cuntooyinka fudud sida (baradhada, naacna, iwl)



Cab biyaha tuumbada maalintii oo dhan si aad uga maydho sonkorta sababta suuska ilkahaaga.

Haddii aad dareento xanuun, barar, ama ilko dillaac, ha sugin inaad ballan samaysato. Wac ama qoraal u dir DentistLink lambarka 844-888-5465 si aad ugula xiriirto daryeelka ilkaha ee degdegga ah.